



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay :

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Luulyo 16, 2021

Ku socota: Hay'adaha Maamulka Kiiska ODDS iyo Daneeyayaasha
Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Maamulaha Siyaasada ODDS oo Cusub

Waxaan ku faraxsanahay in aan ku dhawaaqo in Caitlin Shockley ay aqbashay booska Maamulaha Kooxda Siyaasada ODDS waxayna doorkeeda cusub bilaabaysaa Luulyo 14, 2021.

Caitlin waxay u timiday ODDS sanadkii 2019 iyada oo ah xubin ka tirsan kooxda carruurta ka hor intii aanay qaadan doorka Waxqabadka Qofka Muhiimada La Siinayo & Isku duwaha Adeega Loo Siman Yahay. Ka hor intii aysan imaan ODDS, Caitlin waxay soo noqotay Isku duwaha Adeegyada ee Degaanka Clackamas, balse waxay heshay bilawgeeda qaybtan dunida aan faa'iido doonka ahayn, iyada oo hoggaaminaysay barnaamijyada waxbarashada waalidka, qayb galinta bulshada, iyo wax u doodista. Caitlin waxay jeceshahay in ay muhiimada siiso sinnaanta iyo isku xirnaanta loogu talagalay dadka qaba naafanimada maskaxda ama korriinka ee dhanka nidaamka siyaasad dejinta. Caitlin waxay haysataa Shahaadada Jaamacadeed ee Farshaxanka ee dhanka Ingiriisiga iyo shahaadada qalin-jabinta oo ah Maamulka Bulshada. Waa xubin ka tirsan Guddiga Naafanimada Korriinka ee Oregon (2015-waqtigan xaadirka ah), Guddiga Tala bixinta ee Gobolka ee Waxbarashada Gaarka ah (2016-waqtigan xaadirka ah) waana Safiirka Charting the LifeCourse oo la aqoonsan yahay.

Caitlin waxaa loo doortay booska Maamulaha Kooxda Siyaasada ka dib markii ay nidaam wareysi oo adag la martay ka qayb qaadashada daneeyaha. Caitlin waxay khibrad iyo jacayl qoto dheer u keentaa

shaqadani, iyada oo gacan ka geysashadeeda ballaaran ee dhinacyada siyaasada, adeega loo siman yahay, waxqabadka qofka muhiimada la siinayo ee shaqadeedu iyada siiyaan aasaas adag oo ah talaabo qaadista doorkan.

Fadlan igula soo biira u hambalyeynta Caitlin.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa <http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.